THE HERITAGE INSTITUTE
FORUM FOR IDEAS

The Heritage Institute For Policy Studies

# THE ROLE OF SOMALIS IN PEACE IN THE HORN OF AFRICA:

Unlocking Human Capital for a Shared Prosperity

# KAALINTA SOOMAALIDA EE NABADDA GEESKA AFRIKA

Dabar Furidda Karaanka Ummadeed Si Loo Hiigsado Horumar Baahsan

19 DECEMBER 2019

# WAR MURTIYEED

The Heritage Institute for Policy Studies

# War Murtiyeed

Madasha Aragti Wadaagga Soomaalida ee sannadlaha ah oo kulmisa haldoorka Soomaalida meel walba oo ay joogaan waxay markii saddexaad ku qabsoontay caasimadda Jamhuuriyadda Djibouti, intii u dhaxeysay 15-19-kii December 2019. Madasha waxaa qabanqaabiya Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage ee fadhigiisu yahay Muqdisho, waxaana marti galiya Jamhuuriyadda Djibouti. Halkudhigga Madasha sannadkan wuxuu ahaa: "Kaalinta Soomaalida ee Nabadda Geeska Afrika: Dabar Furidda Karaanka Ummadeed (Human Capital) Si Loo Hiigsado Horumar Baahsan". Madashu waxaa looga hadlay mowduucyo taabanaya qaybaha kala duwan ee bulshada Soomaalida, waxaana kasoo qayb galay 180 qof oo isugu jira masuuliyiin, ganacsato, aqoonyahan, dhallinyaro, haween iyo dadka u ololeeya arrimaha Soomaalida. Arrimaha diiradda lagu saaray waxaa kamid ah: (b) Nabadda Geeska Afrika (t) Arrinta Somaliland (j) Horumarinta Karaanka Ummadeed (x) Ganacsiga (kh) Siyaasadda iyo doorashooyinka Soomaaliya, Somaliland iyo guud ahaan gobolka (d) Kaalinta dhallinyarada.

Madaxda iyo dadka magaca leh oo ka soo qayb-galay Madasha Aragti-wadaagga Soomaalida ee sannadkan 2019, waxay ahaayeen 180 dibadda ka yimid iyo 70 reer Jabuuti ah, in kasta oo aan la wada qori karinna, waxaan ka xusi karnaa:

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti Mudane Ismaaciil Cumar Geelle, Wasiirka Dhaqanka Jabuuti Muumin Xasan Barre, iyo wasiirada arrimaha dibadda iyo maaliyadda, iyo danjirayaasha Jabuuti ee Soomaaliya ee hadda iyo kal hore. Soomaaliya waxaa matalayey wasiirada arrimaha dibadda, waxbarashada, maaliyadda, dastuurka iyo wasiir-ku-xigeenka caafimaadka; Wafdiga Itoobiya waxaa hoggaaminayey Madaxweyne Mustafa Muxumed Cumar (Cagjar) oo ay weheliyaan wasiiro muhiim ah iyo weliba Xoghayaha ONLF ee xiriirka dibadda; Ka qayb-galayaasha Somaliland waxaa ka mid ahaa hoggaamiyayaasha xisbiyada mucaaradka ah, ganacsato, aqoon-yahanno iyo hoggaamiyayaal bulshada rayadka ah sida Dr. Bulxan, Professor Cabdisalaam Yaasiin iyo Marwo Sucaad Odawaa. Dadka kale ee magaca leh ee Madasha sannadkaan ka qaybgalay waxaa ka mid ah: ganacsadaha caanka ah Axmed-Nuur Cali Jimcaale, hoggaamiyayaasha bangiyada Amal iyo Premeir, madax sare oo ka tirsan Dahabshiil; Safiir Maxamuud Dirir, marwo Caasha Xaaji Cilmi iyo abwaanada iyo fanaaniinta waaweyn ee Soomaaliya sida Xasan Aadan Samatar, Cawaale Aadan, Cabdi Qays, Abaabe, Cabdullaahi Xasan Geney iyo Kaynaan. Marti-sharafta kale ee goobjoogga ka ahaa Madasha Aragti wadaagga waxaa ka mid ahaa, wafdi Sweden ah oo uu hoggaaminayey Danjirahooda Soomaaliya, diblomaasiyiin sare oo ka socda Switzerland iyo Denmark iyo wakiil safaaradda Ingiriiska iyo saraakiil Sanduuqa Xasilinta Soomaaliya ee SSF.

## Nabaddeynta iyo Horumarinta Dadka Soomaaliyeed

Madasha waxaa lagu gorfeeyey xaaladda amni ee gobolka iyo doorka ay dadka Soomaaliyeed ka qaadan karaan nabadaynta geyiga Soomaaliyeed. Madashu waxay ugu baaqaysaa hoggaanka Soomaaliyeed inay dardar-galiyaan nabadeynta dadka Soomaaliyeed.

Sida ka muuqata daraasaadka iyo doodaha lagu soo bandhigay shirka, waxaa lama huraan ah in la kordhiyo, lana tayeeyo karaanka dadeed (human capital) ee Soomaalida si ay ula tartamaan ummadaha kale ee ku nool Geeska Afrika iyo qaaraddaba. Sidaa darteed, Madashu waxay ugu baaqaysaa hoggaanka dadka Soomaaliyeed in ay ka shaqeeyaan sidii loo hormarin lahaa karaanka aqoonta iyo caafimaadka shacabkooda.

Madashu waxay saluug ka muujisay tirada kooban ee ardeyda ah ee fursadaha waxbarasho hela. Waxayna u aragtay arrin murugo leh in inta badan aysan da'yarta Soomaaliyeed fursad u helin waxbarasho. Sidoo kale, waxaa jirta in waxbarashada kooban ee ka jirta geyiga Soomaalida ay tayadeedu hooseyso. Haddaba, Madashu waxay ugu baaqaysaa hoggaanka Soomaaliyeed inay muhimadda koowaad siiyaan sidii ay waxbarasho tayo leh u gaarsiin lahaayeen inta ugu badan da'yarta Soomaaliyeed. Madashu waxay soo jeedinaysaa in sanadka 2020 loo aqoonsado sanadkii waxbarashada Soomaalida. Islamarkaasna uu noqdo halku-dheggu "Yaan ilmaha looga tegin jahli".

Dhaqaalaha la galiyo caafimaadka dadka Soomaaliyeed waa mid aad u kooban. Madashu waxay hoggaanka Soomaaliyeed, meel kasta oo ay joogaan, ugu baaqeysaa in ay culeyska saaraan sidii loo kordhin lahaa adeegyada caafimaadka ee ay dadka Soomaaliyeed u baahan yihiin.

Tayeynta karaanka dadeed waa inuu noqdaa mid dhammeystiran, gaar ahaan dhinacyada waxbarashada iyo caafimaadka. Dad tayo leh ayaa la tartami kara caalamka intiisa kale. Madashu waxay ugu baaqaysaa qof kasta oo Soomaali ah inuu qyybta kaga aaddan ka qaato horumarinta waxbarashada iyo caafimaadka.

## I. Jamhuuriyadda Jabuuti

Madashu waxay mahad ballaaran u jeedineysaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Djibouti, Mudane Ismaaciil Cumar Geelle oo si hagar la'aan ah u marti galiyey kasoo qayb galayaasha madasha, isagoo sii adkeeyay kaalinta hormuudka ah ee ay Jamhuuriyadda Jabuuti ugu jirto dhammaanka dadka Soomaaliyeed, gaar ahaan weeleynta aqoonta, dhaqanka iyo haldoorka. Guud ahaan shacabka iyo dowladda Jamhuuriyadda Jabuuti waxay muujiyeen sida ay hiil iyo hooba ula garab taagan yihiin dadka Soomaaliyeed meel walba oo ay joogaan iyo aragti walba oo ay leeyihiin. Madashu waxay Jamhuuriyadda Jabuuti ka codsanaysaa inay sii xoojiso kaalintaas qiimaha iyo qaayaha leh. Madashu waxay Jamhuuriyadda Jabuuti u aqoonsatay xuddunta shacab weynaha Soomaaliyeed ee Geeska Afrika.

Madashu waxa ay soo dhaweysey dadaalada iyo hindisayaasha Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle ee ku aaddan kobcinta iyo horumarinta Afka Soomaaliga ee dhammaan geyiga Soomaalida. Sidaas darteed, madashu waxay ugu baaqday dhammaan xarumaha waxbarashada iyo cilmibaarista in ay garab istaagaan dadaalkaas.

Madashu waxay bogaadinaysaa doorka muuqda ee Jabuuti ka qaadatay nabadeynta Soomaalida, gaar ahaan shirarkii dib-u-heshiisiinta, dowladihii lagu dhisay, ciidamada hiil walaal iyo dardar-gelinta wadahadallada Soomaaliya iyo Soomaaliland. Madashu waxay ku dhiirrigelinaysaa inay sii kordhiso doorkaas muhiimka ah.

## II. Soomaaliya

Madashu waxay dowladda iyo shacabka dalka Soomaaliya uga tacsiyeyneysaa dadka kuu dhintay daadadkii dhawaan ka dhacay gobollo kala duwan oo dalka Soomaaliya ku yaalla. Madashu waxay aad u bogaadineysaa gurmadka ay sameeyeen dadka Soomaaliyeed meel ay joogaanba. Madashu waxay ku baaqaysaa in dowladda Soomaaliya, oo kaashanaysa shacabkeeda iyo deeq bixiyayaasha, inay ka tabaabusheysato aafooyinka dabiiciga ah ee soo noqnoqda.

Dowladda Soomaaliya waxay kordhisay dhaqaalaha ay ku bixiso waxbarashada iyo adeegyada kale. Madashu waxay dhiirrigelinaysaa arrinkaas, waxayna ugu baaqaysaa madaxda Soomaaliya in si mug leh loogu soo jeesto kobcinta karaanka ummadda ee dhanka aqoonta iyo caafimaadka.

Madashu waxay walaac ka muujineysaa xiisadaha siyaasadeed ee Soomaaliya hareeyay sannadkan, waxayna ugu baaqaysaa dowladda Soomaaliya iyo saamileyda kale inay amuurohooda ku dhammeystaan wadahadal iyo isqancin iyo nabad. Si gaar ah, madashu waxay ku baaqaysaa in saamileyda siyaasaddu ka heshiiyaan hannaanka doorashooyinka 2020-ka, lagana fogaado wax walba oo keeni kara kicinta xiisado siyaasadeed iyo khalkhal amni. Madashu waxay sidoo kale ku baaqaysaa in doorashooyinkaas ay ku qabsoomaan wakhtigii loo muddeeyay.

Madashu waxay soo dhaweyneysaa heshiiska laga gaaray khilaafkii u dhaxeeyay Ahlu Sunna Wal-Jamaacah iyo Dowladda Federaalka ah, kahor doorashooyinka Galmudug. Madashu waxay u mahad celineysaa dhammaan intii gacanta ka geysatay taabba galinta heshiiskaas. Madashu waxay ku baaqaysaa in doorashooyinka Galmudug ay noqdaan kuwa xor ah oo xalaal ah.

Madashu waxay ku bogaadineysaa Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya dadaalka ballaaran ee ay ka sameysay barnaamijka deyn cafinta. Madashu waxay sidoo kale ammaaneysaa kaalinta ay arrintan ka qaateen hey'adaha maaliyadda adduunka iyo deeq bixiyayaasha. Deyn cafintu waxay ahamiyadda koowaad u leedahay dhammaan qaybaha kala duwan ee Soomaalida

Madashu waxay ugu baaqaysaa Dowladda Soomaaliya inay dib usoo nooleyso wadahadalkii ay la laheyd Somaliland ee yoolkoodu ahaa in isqancin iyo isku tanaasul ku saleysan lagu dhammeeyo arrinta Somaliland oo ah mid masiiri ah.

## Somaliland

Madashu waxay walaac ka muujineysaa xiisadaha siyaasadeed ee toddobaadyadii lasoo dhaafay ka aloosnaa Somaliland. Madashu waxay soo dhaweyneysaa dadaalka nabaddooniimada ah ee ay sameeyeen hoggaanka dhaqanka Somaliland, si loo soo afjaro xiisadahaas.

Madashu waxay ugu baaqaysaa xukuumadda Somaliland inay wadahadal toos ah la gasho xisbiyada mucaaradka ah, si heshiis looga gaaro arrimaha khilaafka keenay ee la xiriira guddiga doorashooyinka.
Madashu waxay sidoo kale ugu baaqaysaa hoggaanka Somaliland inay sii wadaan wadahadalkii kala dhaxeeyay Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya, si xal waara looga gaaro arrinta ay isku-maandhaafsan yihiin xukuumadda Somaliland iyo Dowladda Soomaaliya.

The Heritage Institute for Policy Studies

## III. Hoggaanka Dowlad-Deegaanka Soomaalida

Madashu waxay bogaadineysaa kaalinta muuqata ee ay Dowlad-Deegaanka Soomaalida dalka Itoobiya uga jiraan, gaar ahaan xilligan kala guurka ah. Madashu waxay sidoo kale bogaadineysaa dowladda gobolka Soomaalida sida ay isaga xilsaartay nabadda iyo dibu heshiisiinta dadka walaalaha ah ee Soomaalida gobolkaas.

Madashu waxay dhiirri galineysaa in Soomaalidu ay laba jibbaaraan kaalinta ay uga jiraan guud ahaan dalka Itoobiya, ha ahaato mid siyaasadeed iyo mid dhaqan-dhaqaaleba. Iyadoo laga faa'ideysanayo isbaddalka cusub, Madashu waxay ugu baaqeysaa madaxda iyo shacabka dowlad-deegaanka Soomaalidu in ay hormuud ka noqdaan doodaha muhiimka ah ee gobolka ka socda.

Madashu waxay ku baaqaysaa in la fududeeyo isku socodka dadka Soomaalida ah iyo ganacsigaba. Arrintaasi waxay horseedeysaa inuu bullaalo ganacsiga gobolka Geeska Afrika, waxayna qayb ka tahay go'aankii ay gaareen madaxda Midowga Afrika ee yoolkiisu ahaa in dadka qaaraddani ay si bilaa shiddo ah isugu gooshaan, islana ganacsadaan.

## IV. Hoggaanka Soomaalida Kenya

Madashu waxay bogaadineysaa kaalinta baaxadda leh ee ay Soomaalida Kenya uga jiraan dalkaas, gaar ahaan dhinacyada siyaasadda, dhaqaalaha iyo hoggaanka bulshada. Madashu waxay sidoo kale bogaadineysaa sida ay Soomaalida Kenya usoo dhaweeyaaan walaalohood Soomaaliyeed, ugu fududeeyaan inay dalkaas si nabad ah ugu noolaadaan.

Madashu waxay ugu baaqaysaa hoggaanka Soomaalida Kenya inay ka shaqeeyaan horumarinta xiriir ku dhisan ixtiraam iyo deris-wanaag.

Madashu waxay ku dhirri galineysaa dowladaha Soomaaliya iyo Kenya inay ixtiraamaan go'aanka Maxkamadda Caddaaladda Dunida ee haatan gacanta ku heysa kiiska badda.

Madashu waxay ku dhiirrigelinaysaa hoggaanka Soomaalida Kenya inay xal u raadiyaan arrimaha saameynaya ganacsiga oo guud ahaan dan u ah gobolka Geeska Afrika, gaar ahaan, burburinta (taawarrada) taleefonka shirkadda Hormuud. Madashu waxay ugu baaqaysaa hoggaanka Soomaalida Kenya inay arrintaas wax ka qabtaan.

Madashu waxay ugu baaqaysaa hoggaanka Soomaalida, heer walba, inay ka shaqeeyaan fududeeynta isku socodka dadka deggan soohdinta labada dal. Arrintaasi waxay horseedeysaa inuu horumaro ganacsiga u dhaxeeya dalalka Geeska Afrika. Waxayna qayb ka tahay go'aankii ay gaareen madaxda Midowga Afrika ee yoolkiisu ahaa in dadka qaaraddani ay si bilaa shiddo ah isugu gooshaan, islana ganacsadaan.

## V. Soomaalida Qurbaha

Madashu waxay bogaadineysaa kaalinta muuqata ee ay Soomaalida qurbuhu ku yeelanayaan dalalka ay u hijroodeen. Madashu waxay Soomaalida qurbaha ku ammaaneysaa inay ka dhex muuqdaan bulshooyinka ay la nool yihiin. Waxayna ku dhiirri galineysaa inay laba jibbaaraan dadaalkooda. Madashu waxay ugu baaqaysaa inay xoojiyaan dhaqanka iyo afka.

Sidoo kale, madashu waxay ku bogaadineysaa Soomaalida Qurbaha kaalinta hormuudnimo ee ay uga jiraan horumarinta dadka Soomaaliyeed ee Gobolka Geeska Afrika. Waxayna ugu baaqeysaa Soomaalida qurbaha inay kordhiyaan ka shaqeynta hawlaha tayeynta karaanka dadka (capacity building).

## Gunaanad

Madashu waxay mahad ballaaran u jeedineysaa dowladda iyo shacanka Jabuuti. Sidoo kale, Madashu waxay u mahad celineysaa Machadka Heritage, dadaalka culus ee uu dhabarka u ritay, waxayna ku dhiirri galineysaa inuu sii wado dadaalkaas.